

Qoraallada Dawooyinku Dhakhtarku Qoro

Marka aad u tagtid dhakhtar, si lagu baadho, ama sababta oo ah waad jiran tahay, dhakhtarku waxa uu go'aan ka gaadhi karaa inaad u baahan tahay dawo lagu qoro.

Qoraalka ku yaalla dawada dhakhtarku kuu soo qoray waxa ku yaalla war muhiim ah. Warku waxa uu ku yaalla qoraalka. Waxa dhici karta in qoraallada kala duwan uu meelo kala duwan warku kaga yaallo.

1	➔	Main Street Pharmacy	(612) 555-1234
		1200 Main Street North, Minneapolis, MN	
2	➔	Dr. R. Wilson	
3	➔	Rx No: 300443	01/04/2005
4	➔	JOHN JOHNSON	
5	➔	Dose: TAKE ONE TABLET BY MOUTH, DAILY.	
6	➔	Zocor Tabs Mfg Merck	
7	➔	Qty: 30	
8	➔	REFILLS: 3 BEFORE 12/08/05	
9	➔		

Lambarka 1 waa magaca, adreeska iyo lambarka teleefonka ee farmasiga bixiyay dawada dhakhtarku soo qoray. Dawadan waxa bixiyay farmasiga "Main Street Pharmacy".

Lambarka 2 waa magaca dhakhtarka. Dhakhtar R. Wilson ayaa qoray dawadan.

Lambarka 3 waa tirada dawada dhakhtarku qoray, taasoo ku bilaabanta koobitaanka "Rx" ama "No". Tirada dawadan dhakhtarku qoray waa 300443.

Lambarka 4 waa magaca bukaanka. Dawadan waxa loo qora John Johnson. Waa inaan qof kale isticmaalin dawadan.

Lambarka 5 waxa uu kuu sheegaya dawada inta aad ka qaadanaysid iyo goorta aad qaadanaysid. Waxa taa lagu daba qori karaa ereyga "Dose" (Qadar Qaadasho). Waa in John uu qaato 1 kiniin ah hal mar maalintii.

Lambarka 6 waa magaca dawada, iyo magaca shirkadda sameysay. Dawadan waxa la yidhaahdaa "Zocor", waxana sameeya Merck.

Lambarka 7 waa tirada kiniinka. Waxa taa lagu daba qori karaa koobitaanka "Qty" ama ereyga "Quantity" (Tirada). Dawadan dhakhtarku qoray waa 30 kiniin ah.

Lambarka 8 waa tirada inta jeer ee dawada la cusbooneysiisan karo. Marka aanay cusbooneysiini jirin tiradu waxay noqon doontaa "0".

Lambarka 9 waa taariikhda dhicitaanka dawada. Waxa taa lagu daba qori karaa "refill before" (cusbooneysii ka hor) ama koobitaanka "Exp.". Taasi waa taariikhda ugu dambeysa ee farmasigu cusbooneysiin karo dawada dhakhtarku qoray.

Wixii ah war dheeraad ah ee ku saabsan qoraallada dawooyinka aad iska iibsan kartid warqad dhakhtar la'aan (OTC) ka eeg Qoraallada Dawooyinka OTC.

Wixii ah war dheeraad ah ee ku saabsan qoraallada digniinta ah ka eeg Qoraallada Digniinta ah.

Wixii ah war dheeraad ah ee ku saabsan waxyeellooyinka dawooyinka ka eeg Waxyeellooyinka.